## Nabadgelyada macluumaadkaaga caafimaad

Waxaan raacnaa heerar dawladeed oo adag oo la xiriira keydinta macluumaadkaaga caafimaadka ee dhammaan qaab kasta ah. Waxaan si joogta ah u horumarinaa oo aan u baarnaa nidaamyadeena si looga ilaaliyo macluumaadkaaga helida cidaan u idmaneyn, lumida ama si khalad ah u isticmaalid kale.

Adeegyada caafimaadka dadweynaha NSW waxay ku hayaan macluumaadka diiwaan warqadeed. Nidaamyadooda diiwaanka caafimaadka oo elektaroonig ah iyo HealtheNet ka NSW.

HealtheNet waa diiwaan elektaroonig ah oo xafidan oo gobolka oo dhan ah oo uuay isticmaalosho adeega caafimaadka dadweynaha NSW. HealtheNet waxay ka kooban tahay soo koobid ah macluumaadkaaga caafimaad, tusaale, macluumaad kooban oo ku saabsan markaad isbitaalka ka baxday, natiijooyinka baaritaanada wiisito iyo saamiyadaba iyo macluumaadka daawada.

Haddii aad tagto adeega caafimaadka dadweynaha ee meel kasta oo ku taal NSW, xaaladaha badidooda macluumaadkan kooban waxay ka heli doonaan shaqaalaha rugta caafimaad ee ku daaweynaya HealtheNet.

## My Health Record (Diiwaankeyga Caafimaad)

My Health Record waa nidaamka diiwaanka caafimaadka digital ka ee qaranka Australia. Dhammaan dadka Australian ka ahi waxay leeyihiin My Health Record, inaad doorato inaadan mid yeelan mooyee.

Haddii aad tagtay adeega caafimaadka dadweynaha ee NSW, macluumaadka kooban ee caafimaadkaaga waxaa loo soo dirayaa My Health Record. Shaqaalaha caafimaadka dadweynaha ee NSW waxaa laga yaabaa inay sidoo kale eegaan, oo ay u diraan macluumaadka My Health Record kaaga.

Haddii aad leedahay My Health Record, laakiinse aadan u dooneynin macluumaadkaaga ballanta dhakhtar gaar ah ama in lagu daro booqashada isbitaalka ee My Health Record, waa inaad wargelisaa adeeg caafimaad bixiyaha bilowga booqashadaada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan My Health Record, taleefan u dir 1800 723 471, ama gal: www.myhealthrecord.gov.au

## Nala soo xiriir

Haddii aad qabto su'aalo ama cabashooyin ku saabsan arimaha gaarka ah ee macluumaadkaaga caafimaad, fadlan la xiriir Privacy Contact Officer (Sarkaalka Xiriirka Arimaha gaarka ah) ee wakaalada Caafimaadka NSW ee heysa macluumaadkaaga caafimaad.

Wixii faahfaahin ah Privacy Contact Officer, fadlan gal: www.health.nsw.gov.au/patients/privacy/Pages/privacy-contact.aspx

## Adeega turjumaada afka iyo qoraalka

Haddii aad ugu baahan tahay caawimaad la xiriirta adeegyada kore ama aad u baahan tahay turjumaad qoraal ah, fadlan ka wac Adeega Turjumaada afka iyo Qoraalka (TIS) 13 14 50.

Wixii ah warqada macluumaadka arimaha gaarka ah oo luuqado kale ah, booqo Multicultural Health Communication Service ee: www.mhcs.health.nsw.gov.au

Somali

**Privacy Leaflet for Patients**

**How we protect your health information**

# Buugyaraha arimaha gaarka ah ee loogu talagalay bukaanka

## Sidaan u ilaalino macluumaadkaaga caafimaadka

## Ururinta macluumaadka caafimaadkaaga

Si laguu siiyo daaweeyn haboon, waxaa laga yaabaa inaan kaa qaadno macluumaad caafimaad oo kala duwan oo adiga kugu saabsan. Kuwaas waxaa laga yaabaa inay ku jiraan macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga, natiijooyinka baaritaanka wiisatada iyo saamiyada, raajada iyo sawirada kale, iyo macluumaad ku saabsaan daawadaada.

Waxaan kaaga qaadaynaa macluumaadka caafimaad si toos ah adiga meel alaale meeshii suurtagal ah. Haddii aysan tani suurtagal ahayn, ama ay tahay xaalad dedeg ah, waxaa laga yaabaa inaan tixraacno diiwaankaagii hore ee caafimaadka, kuwa kale ee bixiya daryeelka adeega caafimaad iyo My Health Record (Diiwaanka Caafimaadkayga).

Waxaa laga yaabaa sidoo kale inaan u baahano ka qaadida macluumaad xubin qoyska ah, saaxiib, xannaaneeye ama qof kale sida turjumaan naga caawin kara si aan kuu siino daryeelka caafimaad ee ugu haboon.

## Isticmaalka ama bixinta macluumaadkaaga caafimaad

Macluumaadkaaga caawimaad waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan adeega caafimaadka dadweynaha NSW, ama la siiyo adeega caafimaadka bannaankiisa, si loo awoodo daaweyn iyo daryeel haboon in lagu siiyo.

Tusaale, macluumaadkaaga waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan ama loo bixiyo sida soo socota:

- adeegyada caafimaad ee kale, isbitaalada ama dhakhaatiirta takhasuska ee ku lugta leh daryeelkaaga caafimaad.
- GP-ga aad magacowday, oo ay ku jiraan macluumaadka dukumiintigaaga gudbinta ee markaad baxeyso.
- Adeega Ambalaasta NSW.
- ku My Health Record.
- in guriga lagaala soo xiriiro wixii ku saabsan ballamo dabagal ah.
- Xannaaneeyahaaga si ay u caawiso daryeelkaaga.
- in lagaa la soo xiriiro natiijo celin si aad aragti uga bixiso adeegyadii aad heshay.
- shaqaalaha daryeelka diinta, oo ay ku jiraan wadaada isbitaalka, oo bixiya daryeelka diimeed iyo dareenka.
- ardeyda iyo shaqaalaha kale ujeedooyin tababar awgood.
- adeegyada caafimaad ee kale iyo dhinacyada saddexaad ee u idman inay caawiyaan si ay uga hortagaan waxa ku soo wajahan iyo khatarta qofka noloshiisa, caawimaad ama samafalka, sida xaaladaha degdega ah.
- Wixii ah ujeedooyinka la xiriira ku deeqida xubin ama unug. Tan waxaa laga yaabaa inay ku jiraan faahfaahinta xiriir ee qaraabada kuugu dhow.
- Waxqabadka maamulka iyo hawlgalka, oo ay ku jiraan maalgelinta, qorsheynta, ammaanka iyo hagaajinta tayada.
- In la baaro dhacdo ama cabasho.
- In la maareeyo fal sharciyeed ama cabasho uu ka keenay bukaanku adeega caafimaadka.

**Haddii aadan dooneynin inaan ururino, isticmaalno ama bixino macluumaad ka kugu saabsan asiga, waxaad u baahan doontaa inaad noo sheegtid waana kaala hadli doonaa wixii cawaaqib ah ee ay tani ku yeelaneyso daryeelka caafimaadkaaga.**

Sharcigu wuxuu sidoo kale ogolaanayaa ama wuxuu u baahan yahay in macluumaadka caafimaadkaaga la siiyo dhinac saddexaad, tusaale:

- dawlad goboleedka iyo wakaalada dawlada dhexe wixii ah ujeedooyin warbixineed sharci ah, sida ka warbixinta cudurada infekshinka leh, kansarka iyo cudurada kale ay tahay in lays wargeliyo, si loo sheego dhalashooyinka iyo dhimashooyina iyo in la bixiyo faahfaahinta Medicare ka.
- cilmi baarayaasha mashruucyada cilmi baarista danaha dadweynaha siday ogolaadeen Human Research Ethics Committee.
- adeegyada kale ee caafimaadka ama wakaaladaha dhaqangelinta sharciga, sida boliiska, haddii aad na siiso macluumaad la xiriira dembi khatar ah, oo ay ku jiraan waxgaarsiin khatar ah, qalalaasha guriga ama waxyeelada ilmaha.
- wakaaladaha kale meesha macluumaadku uu la xiriiro ammaanka, samafalka ama fiyoobida ilmo ama qof dhalinyaro ah.
- inaad raacdo maxkamad uga yeerid ama ogolaansho baaritaan haddii macluumaadkaaga caafimaadka looga baahan yahay.

## Qorshaha Ceymiska Naafada Qaranka (NDIS)

Haddii aad, ama qof ku metelaya, nasii nuqulka Qorshahaaga NDIS ama dukumiinti kale oo NDIS, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama u bixino macluumaadkan ujeedooyin la xiriira daryeelka caafimaadkaaga iyo adeegyada bulshada. Tan waxaa laga yaabaa inay ku jiraan la wadaagida macluumaadka wakaaladaha kale ee dawlada, qaybaha gaarka ah ama ururada aan dawliga ahayn si loo caawiyo in adeegyada caafimaadka iyo kuwaan caafimaadka ahayni fuliyaan baahidaada.

## Helitaanka macluumaadkaaga

Xaq baad u leedahay inaad codsato helida macluumaadka caafimaadkaaga ee aanu heyno. Caadi ahaan waxaa lagu weydiin doona inaad ku soo codsato qoraal helida iyo inaad bixiso aqoonsi. Waxaa laga yaabaa in lagugu dalaco lacag ujro ah haddii aad codsato nuqulada diiwaanka caafimaadkaaga. Waanu ka soo jawaabnaa codsiyada helitaanka macluumaadka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah, xaaladaha badidood waxaan ka badneyn 28 maalmood.

Helitaanka macluumaadkaaga waxaa laga yaabaa in la diido xaalado khaas ah awgood, sida haddii lagu siiyo ay adiga ama qof kale khatar gelinayso maskaxeed ama dhibaato jireed.

Haddii aad rumeysan tahay in macluumaadka aan heynaa uu khaldan yahay ama khalad la sameeyey, fadlan na soo ogeysii waana saxeynaa ama waxaan ku dareynaa qoraal diiwaankaaga caafimaad.

Codsiyada helitaanka diiwaankaaga caafimaad waa in lagu soo hagaajiyaa midkood Medical Records Department ama maareeyaha goobta adeega caafimaadka ee aad tagtay.